IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 1 Sebt. 1983 L. 9

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريدة رسمية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIIMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 16 ee 24 Luulyo 1983, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada kuna saabsan Mashruuca Xiriirka isgaarsiinta Carbeed BOG. 553

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 20 ee 24 Luulyo 1983, meel marin heshiis Amaaheed oo dhaxmaray JDS iyo Sanduuqa Carbeed Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Mashruuca Xiriirka Is/ta Carbeed » 554

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٢ ، بتاريخ
التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهورية
الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى
والاجتماعى ... ٥٥٥

XEER MADAXWEYNAHA JDS, 21 ee 16 Luulyo 1983, Magacaabid ku Xigeenno Xeer Ilaaliye Guud M. B. D. » 556

QAYBTA SADDEXAAD TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

WASAARADDA H. GUUD 21.1.83, B. Naado Dhul J/le Saynab Saciid XasanL. 354 » 557

WASAARADDA H. GUUD 21.1.83, B. Naado Dhul J. Shriif Sangaaf Maxamed L. 355 » 558

WASAARADDA H. GUUD 25.1.83, B. Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Sheekh Cus maan L. 356 » 559

WASAARADDA H. GUUD 27.1.81, Bed. Dhul Jaalle Maxamed Kulane Maxame L. 357 » 560

WASAARADDA H. GUUD 27.1.81, Bed. Naado Dhul Jaalle L/Xidile Cabdulca siis Aadan L. 358 » 561

WASAARADDA H. GUUD 31.1.81, B. Naado Dhul J/le Cali Xaaji Ciise L. 359 » 562

WASAARADDA H. GUUD 27.2,83, B. Naado Dhul J. Yaxya Xaaji Ibraahim L. 360 » 563

WASAARADDA H. GUUD 17.2.81, B. Naado Dhul J. Maxamed Sh. Maxamed L. 361 » 564

WASAARADDA H. GUUD 12.3,83, B, Naado Dhul J/le Cali Faarax Muuse L. 362 » 565

WASAARADDA H. GUUD 12.3,83, B, Naado Dhul J/le Cali Faarax Muuse L. 363 » 566

WASAARADDA H. GUUD 12.3.83, B, Naado

WASAARADDA H. GUUD 12.3.83, B, Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Maxamed Cusmaan L. 365 » 568

WASAARADDA H. GUUD 18.3.83, B, Naado Dhul J. Yuusuf Ibraahim Huro L. 366 » 569

WASAARADDA H. GUUD 21.3.83, B, Naado Dhul Jaalle Cabdisalaam Xaaji Maxamuud L. 367 » 570

WASAARADDA H. GUUD 21.3.83, B, Naado Dhul J. Ibraahim Aadan Max/ed L.368 » 571

WASAARADDA H. GUUD 21.1.83, B. Naado Dhul J. Cabdi Aadan Maxamed L. 369 » 572

WASAARADDA H. GUUD 21.3.83, B, Naado Dhul J. Haani Cabdu/hi Jaamac L.370 » 573

WASAARADDA H. GUUD5.3.83, B. Naado Dhul J. Khadiija Cali Salaad L. 371 » 574

WASAARADDA H. GUUD5.3.83, B. Naado Dhul J. Faaduma Cali Salaad L. 372 » 575

جمهورية الصومال الديمقراطية

أتحاد الحركة التعاونية الصومالية

رئيـــــس

٥٧٨ الاتحاد العام للتعاونيات الاستهلاكية والخدمات

SOCIETA COMMERCIALE ITLO SOMLO S.C.I.S.S.P.A. OGEYSIIS ISU YEERID Shir Caadi ahayn L. 374 » 576

SOCIETA COMMERCIALE ITALO SOMLA S.C.I.S.P.A. AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ISTRAORDINARIA L. 375 » 577

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

Sharci Lambar 16, 24,7,83, Oggolaansho He shiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Car oo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saab san Mashruuca Xiriirka Isgaarsiinta Carbeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Carbeed ee horumarin ta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan amaah laca g d oo dhan (Dinaarka Kuweyt) 1.200.000 Malyan, loo guna tala galay Mashruuca Xiriirka Isgaarkiinta Carbeed.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaala da Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 1dii Abriil 1983.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudahaha iyo xaaladaha ay qorayaan qod/da Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, wa xay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharci yada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Destuurka J.D.S. Iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha J. D, S, waxaa awood loo siiyay in uu meel mariyo heshiiska sharcigan lagu tilmaamay,

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta la gu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Mlqdisho, 24 Lug. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 20, 24 Lulyo 1983. Meel marin heshiis amaaheed oo dhaxmaray J. D. S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Mashruuca xiriirka Isgaarsiinta Carbeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, Faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. 16 taariikh 24.7.83 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiskaas.

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel mariyo heshiiskaas kor ku xusan.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERSA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Caxaa la meel mariyay heshiiska amaaheed ee dhex maray J. D. S. iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, looguna tala galay Mashruuca xiriirka Isgaarsiinta Carbeed, heshiiskaas waxaa la gu kala saxiixday magaalada Kuweyt taariikhdu mar kay ahayd 1dii Abriil 1983.

Qod. 2aad

Heshiiskan wuxuu Dalka J. D. S. ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 24 Lug. 1983

MADAXWEYNAHA J. D. S.

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٢ ، بتاريخ

التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ من الدستور والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المبينة اعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم الصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع الاتصالات السلكية واللاسلكية العربية المشترك الخامس الموقع عليها فى مدينة الكويت بتاريخ ١ ابريل ١٩٨٣م .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم ابتداء من تاريخ نشره فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

مقديشو ، فى رئيس ج. ص. د.

(محمد سياد برى)

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 21 ee 16 Luulyo 1983 Magacaabid ku xigeenno Xeer ilaaliye Guud ee MBD.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU AHKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tir. yahay 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsanaa Dishaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo wixii bedelaad ku dhacay.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

J/le Dhamme Cabdullaahi Cabdi Xasan iyo L.X/le Maxamed Daahir Rooble oo Labaduba ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay ku xigeenno Xeer ilaaliye Guud ee Max/da Bad/da Dalka.

Qod. 2aad

Ku xigeennada Xeer ilaaliyuhu waxay yeelanayaan Gunno dhan Sh. So. 800 bishiiba, waxaana laga bixina yaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16 Lulyo 1983

WAAN ARAGNAY Ee Diiwaangelinnay,
Diiwaanka L. 5 Bog L. 177

Muqdisho, 25,7,83,

HANTI DHOWRAHA GUUD
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J. D. S
(Maxamed Siyaad B[illegible])

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BEDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Seynab Saciil Xasanmaalintii taariikhdu 1.1.77 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.— Loona qaatay dan guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdish, Deg. Kaaraan Jidka Balcad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23. 547 ee 6.7.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bede shay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud wuxuu ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 268 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 265 B.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 21 Gen. 1981

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 354